Bilaalow, Salaada aqiim oo noogu raaxee

Saalim Binu Abii Jacdi Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: nin ayaa yiri: shalaytadaydee maan tukado oo aan nasto, waaba iyadoo aad moodid inay arinkaas ay ku ceebeeyeen, wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxaan maqlay isagoo dhahaya: "Bilaalow, Salaada aqiim oo noogu raaxee".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Abuu Daa'uud]

Nin Saxaabada ka mid ahaa ayaa yiri: shalaytadaydee maan tukado oo aan raaxaysto, dadkii la fadhiyey ayaa arinkaa ku ceebeeyey, wuxuu yiri: Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaan ka maqlay isagoo dhahaya: Bilaalow! kor u qaad Aadaanka oo Salaada aqim, si aan ugu raaxaysano, taasina waa waxa ku jira Salaada ee ah Ilaahay la sheekaysigiisa iyo raaxada Ruuxda iyo Qalbiga ah.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65095